



Liiska Hubinta Safarka Hajj iyo Umrah

Socdaalku wuxuu kordhinayaa fursadaha aad ku qaadi karto kuna faafin karto cudurada sida COVID-19, jadeecada, duray ama ifilo iyo minijaatis. U isticmaal liiska hubinta hage ahaan si aad si badbaado leh ugu safarto Makko, Sucuudi Carabiya.

Kahor safarka

- Hubi in ay kuu dhamaystiran yihiin tallaaladaada safarka lagaagabaahanyahay oo ay ku jiraan COVID-19, jadeecada, duray ama ifilo iyo minijaatis. Weydii bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga tallaalada kale ee aad u baahan karto kahor intaan safarin. Wixii macluumaad ah ama agab oo ku saabsan tallaal, booqo [Where to Get Vaccinated \(www.health.state.mn.us/people/immunize/basics/vaxfinder.html\)](http://www.health.state.mn.us/people/immunize/basics/vaxfinder.html) iyo [International Travel Health Clinics Serving Minnesota Residents \(www.health.state.mn.us/people/immunize/basics/travel/yfclinic.html\)](http://www.health.state.mn.us/people/immunize/basics/travel/yfclinic.html).
- Ogsoonow shuruudaha caafimaadka ee lagaa rabo markaad Sacuudi Carabiya aad tagaysid. Ka qaado xogta [Health Requirements | Saudi Ministry of Health \(www.saudia.com/pages/before-flying/travel-information/hajj-and-umrah/health-requirements\)](http://www.saudia.com/pages/before-flying/travel-information/hajj-and-umrah/health-requirements) and [Saudi Arabia: Hajj and Umrah Pilgrimages | CDC Yellow Book 2026 \(www.cdc.gov/yellow-book/hcp/africa-middle-east/saudi-arabia-hajj-and-umrah-pilgrimages.html\)](http://www.cdc.gov/yellow-book/hcp/africa-middle-east/saudi-arabia-hajj-and-umrah-pilgrimages.html).

Hubso inaad qaadata:

- ✓ Maaskaro tayo sare leh, si fiican kuu le'eg oo loogu talagalay qof kasta oo la safraya kooxdaada.
- ✓ Cidda lala xiriirayo haddii ay dhacdo xaalad deg deg ah.
- ✓ Nadiifiyaha gacanta lagu qaato.
- ✓ Daawooyinka lagu qoray iyo daawooyinka kale ee aad banaanka ka gadan karto kuwaas oo aad u baahnaan karto.

Inta safarka lagu jiro

- Caabuqa ku dhaca qeybta sare ee hawa mareenada waa kuwa caadi ka ah xajka. CDC waxay ku talinaysaa inaad gacmaha u dhaqdo si joogta ah, inaad xirato maaskaro iyo inaad ku dadaasho kala fogaanshaha sida ugu macquulsan intaad ku jirto safarkaaga.
- Si loo yareeyo khatarta kugu imaan karta, xiro maaskaro masaajidda iyo meelaha kale ee bulshada dhexdeeda ah, gaar ahaan meelaha dadka ku badan yahay, sida bannaanka.
- Haddii aad la xanuunsan tahay qandho, madax-xanuun, lallabbo, matag, ama calaamado kale, la xiriir dhakhtarka isla markiiba; ha dib ridin inaad hesho daryeel caafimaad haddii aad jiran tahay.

Kadib safarka

- Haddi aad jiratay safarka kadib, aad isbitaalka una sheeg dhakhtarka inaad dhawaan u safartay Sacuudi Carabiya. Iyaga ayaa go'aan ka gaaraya in lagaa baaro cudurada safarka laga qaado iyo in kale.



Minnesota Department of Health | health.mn.gov | 625 Robert Street North PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5414 | La xidhiidh health.idee@state.mn.us si aad u dalbato qaab kale. (Somali)

2/20/2026